7 - XEERKA GEEDKA

Axmed Nuur

Maanta dooddeenu waxay noqon doontaa xeerka geedka. Xeerku guud ahaanba soomaalidu xeerkeedu waa badanyahay; waxaa jira xeerka guurka, xeerka geedka, xeerka xoolaha, xeerka deriska. Xeerarku way badan yihin, laakin maanta kaynu ka doodayna wuxuu noqonayaa xeerka geedka. Xeerka markaynu ka doodayno, waxaa suurtowda inuu yahay mid soomaali oo dhan ka dhexeeyo, laakin magacayaadiisu ay kala geddiisanyihiin. Sida loo kala yaqaanaa waxaa ku xiran sida loo qaybiyo gorta marka geedka la tago ama goolaha la tago ama madasha la tago. Magacyada way fara badan yihiin. Waxaa doodda ka qayb qaadanaya: Daahir Afqarshe, Ibrahim Fiq Buraale, Cali Mudiir, Axmed Nuur Yuusuf, Ciise Maxamed Siyaad, Cabdi Dhegaweyne. Waxaa loo qaadanayaa, waa la tookaysanayaa ama waa la toogaysanayaa doodda. Ninba mar ayuu qaadanaa kan noogu horreyaa wuxuu yahay.

Waxaa la yiri marka geedka la tagayo, oo gar la qaybinayo, waxaa loo baahan yahay, waxyaabahan baa loo bahan yahay baa la yiri odayaalow. Waxaa la yiri guddi xeerbeegta ah waa lama huraan in la helo. Waxaa la yiri buuni wadaad ah mas'alada hadday sharci gasho kala gurana in la helo waa lama huraan, ama baxnaaye oday ah. Waxaa laga maarmaan ah nin guddoomiya ah oo kan ugu dambeesa fermada qaada oo loo yaqaana boqor guddonshe ama ugaas ama graad hadba qolo sida u yaqaanna. Waxaa kaloo lagama maarmaan ahayd guurti odayaal ah. Odayaal la xulay ayay ahaan jiray ama gargayn lo xulay in la helo ayaa lagama maarmaan ahayd markaasaa gorta loo gudbi jiray. Waxaa kaloo lagama maarmaan u ahaan jirtay baa la yiri in la helo gardoone ama muddac gof ah, waxa mudacaya ama wax doonaya inay jiraani. Waxaa kalo lagama maarmaan u ahay jir jirtay baa la yiri garqabeen qog laga mudacayo oo dacwada oggol. Waxaa kaloo lama maarmaan u ahaan jirtay, wax la yiraahdo *makaawiirta shirka ama maraweynta shirka ama maraweynta madasha.* Intaas markii la helo ayaa shirka la qaban qaabin jiray. Haddaba ereyga kan ah, aan dib ugu noqdee warkayga, xeerbeegto muxuu yahay?

Daahir Afqarshe

Arrimahaa aad sheegtay oo miiran ayaa loo baahanyahay haddi cidi istaawiso gar oo ruux wax loo sheeganayo ruuxna wax sheeganayo, waxaa loo baahanyahay intaa aad sheegtay. Marka nimanka kan maqaawiirta ahi waa nimanka garta goynayey ee guddida ahaa ee waayeellado ahaa ee gargayta ahaa. Intaasoo magacyada waa ay wada leeyihiin. Waa niman lagu kalsoonyahay oo loo yaqaano in ay yihiin garyaqaan oo garanaya sida wax loo baaro. Qof waliba wax u ku dooda aan mir ka baxsanayn lagama yaabo inay miyi joogaan oo waxba qoraynin, haddana maskaxdooda kelmad waaxid ah aan ka baxsanaynin ee dacwaddii loo sheegay oo

dhan maskaxda ku xaafidaya.
Waa nimankaas, nimanka aan la'aantooda aan waxba soconaynin, oo la'aantood gar la furi karaynin. Nimankaasu nadaamka garta loo qaadayo ayey haddana dejinayaan, Muddicii ayey u yeerayaan. Muddicii dabadeed isagu wuu hadlayaa ama hebel baan u dhigimaday. Dhigimeshadaas baa looyer ku dhigan. Intii aan xafisiyada la baranin hebel baan dhigimaday oo ii qareen ah ama ii hadlayo. Ninkaasaa dacwadii la wareega mar haddii uu shirka ku qabsado oo uu qareen ka dhigto, keer wax uu dhegta ugu rido oo is yiraahdo ku caawi oo kan ka maqan maahaye, ninkaas soo buuxiyey dacwaddiisi oo dhan u marinaya. Sababtu waxay tahay, waa garyaqaan sida looyerka kale oo aan waxna kaa illabayn oo kan ka fahmo badan oo wixiisi oo dhan si fiican ugu wada sheegaya shirka. Kiina wixii war ahaa oo dhan buu u wada sheegtay. Guddidii markaasay dhegesanaysaa. Guddidii markii ay kaa dhegeysato ayaa la oranayaa mudac-caleeyhi ebel ebel maxaad ka oranaysaa waxaa laguu sheegtay? Haddii wixii uu qiro hadal dambe ma jirto.

Axmed Nuur Fiqi Buraalow xeerbeegto muxuu yahay?

Fiqi Buraale Horta soomaalidu waxay tiraahdaa: hawraarey nimba sii ku yiri maxaa hadhowne si kuu garay yaa laa yiraahdaa. Markaynu xeerbeegto u kacno, saan u aqaano, xeerbeegta waxaa weeye dadkii xeerka yiqiinay oo ma dhaafaanka ahaa. Marka dadkaasu xeer quruun walba ku dhaqanto, xeer waxaa la yiraahdaa dastuur lagu dhaqmo oo umad meel degtaba ay leedahay, marka dadkii xeerka yiqiinay ee dejiyay xeerka aan ku raacayno yaa anigu xeerbeegtu inaka horraysay ay soo dejiyeen. Nimankaas la yiraahdo xeerbeegte ee hore maxay dejiyeen? Xeer guud bey dejiyeen. Xeerkaa guud waa mid soomaali oo dhan, si kasta halooge dhawaaqee, ka dhaxeeya oo lagu xaaltamo.
Waxaa la yiraahdaa ee odayaashaa hore ee xeerbeegtada ay yiraahdeen: "Odayga shirka lagu xumeeyo ama koofiyadda lagaga qaadaa xaal buu leeyahay", xeerbegtadii hore loo yiri. jifida laysku dhufto iyo kabta laysku dhufto iyo dharbaaxadu xeer bey leeyihiin. Xeerka guud bay ka mid yihiin. Gabadha la fara xumeeyo ama soddohda lagu soo gudo ee la faraxumeeyo xeer bay leedahay. Xeerkaas isaga ah waxaa la yiraahdaa, si kasta ha ahaadee, waa xeer guud oo candhuufto lasku dhufto ka mid ah magangelyadaa ka mid ah suuryada ka mid ah waxyaabahaas oo dhan waxa weeye xil saar soomaaliweyn oo xeer guud la yiraahdo, si kastaba ha loo bixiye. Dabadeedna intaas markay dhacdo xeerbegtada ayaa loo jidaysan yahay oo intaas iyo wixii la mid ah ayagaa xaal leeyihiin … oo iyagaa xafidsan oo wada yaqaana. Waxaana ka soo minguuriyeen xeerbeegtidii hore oo awooweyaasheenna hore xeer ay inoo dejiyeen weeye. Marka kuwan markaas jooga xeerki awooweyaasheenna

dejiyeen ayey ku isticmaalayaan, waa aqoonyahaan soo minguuriyey xeerbeegtidii ka horreysay.

Cali Muddiir — Xeerkaan ama loo yaqaano qaanuun aan qoreeyn, umadaha addunka, intaa sharci cusub soo bixin way wada laheen. Waxaana jira meel kastaba ee degaanka markaas la deggan yahay yaa xeerka ku salaysanyahay. Beeraydu xeer bey iska leedahay. Dadka reer magaalka ee dega tuuloyinka waxay iska leeyihiin xeer. Dadka xoolaha dhaqada (ama geela ama lo') waxay leeyihiin, matalan haddaad u firsato dadka beerreyda ahi xeer bey leeyihiin. Hadda odayasha hadlayeen waxay u badnaayeen in ay ka hadlaan waaya aragnimadooda. Berreyda oo kale. Beerta iska riixo, haddii tacaddi kale yimaddo, waxay leeyihiin xeer. Waxaa jira meel egag la yiraahdo oo biyaha laga cabbo. Qofkii habka biyaha siiya, kii biya iska qodiwaaya xeer bey leeyihin, xeerkaaso oo dadka aad u bixiseen xeerbeegto oo kale leh oo magacya kale leh, oo weliba waa guddi barlamaan la yiraahdo. Wax ay gooyeen wax ka soo hadal ma leh. Marka tacsiir baa jirta. Ganaaxyo kale oo badan ayaa jira. Maxaa ku xirantahay kolba degaankas waxa looga isticmaalaya. Sida aad horeyba u sheegteen ninba xubin buu ku leeyahay: wadaadkii boqorkii, cuqaashi, dadki ishaystay, waxa laysku heysto waxa lagu dhammaynaayo.. Marka waxaa la yiraahdaa xaajo ugub, ul lagu dhudhunsho ma leh wax cusub hadday tahay waxa la yiraahdaa. Anigu weli usha ul lagu dhudhunsho weli ma arkin. Macnaa waxaa weeye dembigaan meesha ka dhacay oo loo fadhiyo hadda ka hor mana soo maray? Maxaase lagu dhammeeyey? Haddii odayaashii laga waayo nin yiraahdo waa na soo maray waxaasaa lagu dhammeeyey, uu ugub yahay markaasaa loo dejiyaa sharci.

Axmed Nuur — Aan u sii gudbo buuni wadaad ah. Maxay gartu buuniga wadaadka ahay uga baahantay? Waxaan ku celinayaa Daahir Afqarshe.

Daahir Afqarshe — Buuniga wadaadka ah waxaa weeye ninka aynu haddeer niraahno sheekh oo aynu ognahay in uu kutubaha ku af dheer yahay. Waagi hore waxaa la oran jiray Fiqi, Haddeertuna shiikh baanu u naqaannaa. Waxaynu ognahay ninka kutubahasi si wanaagsan u bartay, oo mas'aladii la wayddiya ba ka soo saaraya kaa horta weeye oo shaki kuma jiro. Haddii meeshi arrimaha caynkaas oo kali dadkani dhex yimaadaanna sida badi gartu laba un bay u kala kacdaa: midi waa wax iska madani ah oo xaal uun bay ku aroortaa, midna waxay ku aroortaa sharci. Marka wixii sharci oo dhan isagaa ka wakiil ah oo sheegaya. Oo dee waa qawaaniin hore oo diinteenna dhigtay yaa la raacaya isagana oo soo saaraya, oo waa halka dabadeed maanta qudaadeenna ay ka xukuntaa oo xeerka iyo shareecada islaamka iswaafajinayaa. Waa lagama maar maar in uu geedka fadhiyaa.

Axmed Nuur — Waxaad i xusuusisay eray ah fiqi baa lo oran jiray bagu waan seexday hurdadii baan ka badin waaye. Buu ku gabye. Marka fiqaa baxnaanoobay baa la oran jiray. Laakin ay eray kale ayaa jira oo ah: oday baxnaansha ah, muxuu kaas geleyaa?

Daahir Afqarshe — Waa ninka mudda simaya arrimaha ee oranaya: war bal yare u kaadiyo ee waayaaragga ahaan jiray, oo diidayo arrinta tan hortayn laba boodiin, oo maalintaas shirka isu yimid hadday caraysan yihiin oo arrinta kulushahay wuxuu doonayaa ilaa caawo inuu ka shaqeeya oo qaboojiyaa oo ragga waxgaradka ah wargeliyaa berrito loo yimaadaa oo weji kale. Waa baxnaanshe, fiqi baxnaanshe ah ama oday baxnaansha ah weeye.

Axmed Nuur — Waxaa ku noqonayaa Ibraahim Fiqi Buraale Ibraahimow bal maxaad ka oran lahayd buuniga wadaadka ah ama fiqi baxnaanshaha ah?

Ibraahim F.Buraale — Horta markaynu niraahno fiqi ama buuni ama wadaad, waa wada ammaan. Magac loo bixiyey ma aha, ee waxaa weeye tacab loo isagu koorsaday oo xog Ilaahay ah. Marka wadaad buuni ah marka la yiraahdo, wadaadka dhawaafay wadaad baanu u naqaanna ama aw baynu u naqaannaa. Buuni marka waxaa weeye koolkoolin iyo ammaan lagu sii ammaanaayo oo lagu hubsaday duul kii lagu yiqiinay. Waa nin aqoon dheer. Marka shirka laysugu yimaaddaana waa ninkii ducaynaayey oo lahaa in Ilaahay mawaafiqa ma siiyo, oo Ilaahay ha siiyo, oo waxaan u Fadhino in Ilaahay ino fududeeyo yaa marka hore faataxada ugu marayaa. Labo qaybood ayuu ka qaybgalayaa ninkaas la yiraahdo bunniga. Hadday xaal shareecad tahay oo dimiin ah oo eegid ah wuu ka qayb galaayaa, wuxuu ugu qayb galaayaa, buuni weeye, waa wadaad buuni ah, oo wuxuu simaayaa, wixii shareecada soo galayna halkaas lagu guddoonsaday. Tan kalena waxaa weeye oo ka soo qayb galaayaa iyagoo isku mid yihiin. Bal matal waxaaba jira, dhaxal baa la isku qabsaday barkhaa caddaa laysku jiray, wax uu baa laysku qabsaday. Taasna waxay noqonaysaa waa in wadaad loo geeyaa, oo wadaad buuni ah oo dacaad ah oo aad iyo aad u wanaagsan. Ducadaas ninkaas buuniga ah uu leeyahay.. waa leeyahay. Ducadaas hore iyo tan dambe ee gebaggebayntaa waa isaga leh.

Axmed Nuur — Bil timinka tusaale nooga bixi, nabarrada.

Fiqi Buraale — Nabarrasa waxaa weeye dhowr meelood bay kala galaayaan. Mid waxaa weeye wax jareexo la yiraahdo oo aan weynayn ama qaniinyo ama dakhar yar oo aan gaarin lafta, ama mid laf caddaatay ama mid dubaaba ah. Markaas wixii qaniinya ah sharcigii Ilaahey baa lagu qaadayaa. Waxaa la egayaa intee bey qoortaasu la egtahay. Qofkaas qaniinay ma labo fool buu

ku qabtay? Ma afar fool baa isugu tegay? Misa afarta horay iyo afar hooseba wuu ku qabtay? Ma ka duseen? Misa waa sannifeen oo in yar bay taabteen. saas baa loo eegayaa. Wuxuu kaloo u eegayaa qaniiyada, nabarka meeshu uu ku dhacay, haweeney iyo ragga ma u kala soocan yihiin? Bil matal, haween quruxdeedu waxaa weeye inta wejiga: sanka wax ma ka gaareen? Dhegta wax ma gaareen? Isha wax maka gaareen? Ilkaha wax ma ka dhaceen? Wixii foolxumo u keeni kara gabadhaas oo quruxdeeda wax u dhimi kara gooni baa loo eegaa. Waxaa jirta, daqar dhacay. Daqarkaas dhacay hadduu aan laf caddaatay ka soo muuqan nooc gooni ah ayaa loo eegaa. Hadday laftu caddaato oo haraggii u sugmo nooc gooni ah baa loo eegaa oo waxaa la yiraahdaa, bilmatal, wadaaddadu waxay ku qiimeeyaan shan halaad. Mid kale ayaa jirto laftu way dillaacdaa laakiin gudaha ma dhicin. Laftu waa sugantay iyo ma sugnin ayaa misna la eegaa. Laftu way isku duntay oo in la qalaaba la doonaya oo laga soo guro, la laba guro, kaasna dugaago baa la yiraahdaa nooc gooniyaa loo eegaa. Noocyada cayntaas ah yaa waxaa loo yiri. Fiqi buuni ah ducadaa horana wuu ku duceeyaa, sharcigana saas ayuu u eegaa oo wax walbuu caddeeyaa. Mar haddii xag sharci ay ku tacalluqdo waa in uu joogaa Fiqi buuni ah.

Axmed Nuur Daahir Afqarshe ayaan ku noqonayaa, Daahirow haddii jaa'ibo timaaddo jinix waa haraa, muxuu yahay micnihisu?

Daahir Afqarshe Jinix waxaa weeye hadallada yar yar ee cayda ah wey iska tagayaan mar haddii nabad yimaado. Nabarkii waa kala weyn yahay oo haddii nabarkaas uu dhaco dabadeed u sii noqdo mid dugaaga ah isaguna kaas waa baaba'ayaa oo waa la illaawaayaa. Dugaagadii hadday timaaddo naf go'day iyadana waa la illaawayaa. Dembigii dhacayey baa kala weyn oo midba mid buu qarinayaa. Wixii yar yaraa .. yaa gardarraa? Ma jirte. Marba heerka uu joogo yaa la xukumayaa

Axmed Nuur Cali Mudiir, maxaad ku dari lahayd doodda odayaasha?

Cali Mudiir Maahmaahdaas, si kale haddaan u niraahdaa waxaa la yiraahdaa: haddii dhib yimaadaa dhabaqa meel dheersha. Wax yar yar iyo cay, kaasay ahayd iyo waxaasu haddii dhib yimaado macna ma jiraan, dhibkaa la raacaa. Haddii aan dib ugu noqdo bulshadu way qeebsantahay, golahaas layskugu yimidna, koox kastaana waxay matilaysaa bulsho. Odayaalkaasu daday ka kala socdaan. Ninka sheekha ahu ninna kama socdo ee wuxuu ka socdaa diinta. Diintu maxay leedahay. Mararka qaarkood wadaadkii markuu sheego diintii ayaa waxaa laga yaabaa dhibkii inuu weynaado amaba yaraado. Markaasaa diintii intaa ma sheegiin? Haa. Dadkii is haystay markaas xeer aan ku heshiis nahay oo hadhow wax ku qaadqaadanno aanu dhiganno oo sharcigaba yaan la aadiinee ee aanu kala qaadano. Macnaha waxa weeye intaan

sharciga hadow leeyahay, in badan yahay baa laga yaabaa, dadkiina waa isu naxariisanayaan in dembigii laga yareeyaa laga yaabaa. Marka waxaa weeye, dadka ishaystaa galaas markastaaba, dadbaa iska horjeeda. Wadaadkana markastaba isaga ninna kama horjeedo. Dadka iska horjeeda ayuu u dhexeeyaa, sidaas daraaddeed wadaadka marka uu sheego in la raaca sharad ma wada aha. Sidaa daraaddeed mararka qaarkeeda waxaa la yirahdaa diinta ma naxariisto, waxaa laga yaabaa waxa go'aanka ah oo lagu gaaro oo xeerka ah in laysku naxariistu ayaa laga yaabaa.

Axmed Nuur — Maxaad leedahay gar xaajo siday u bixi kastaba la yiraahdaa. Yacni garta siday u bixi karto yaa loo eegaa. gartu waxay u kala baxda xis iyo xeer iyo sharci. Xisku waynu garannay waa waxaynu ku heshiinayno. Xeerkuna waa mid inoo degsanaa. Sharciguna waa kii islaamka oo wadaadkii buuniga aha inoo hayey. Aan u soo boodno boqorku isagu macna ma laha, isagu gudoonka ayuu iska leeyahay. Waase laga maarmaan nin guddoomiyo oo firmada saaraa oo sidi garta lagu soo qaybiyay ka guddoomiyo. Waxaan ku noqonayaa Daahir Afqarshe. Daahirow ninkaa guddoomiyaha ahi muxuu garta ku leeyahay.

Daahir Afqarshe — Ma maqashay soomaalidu in ay ahaan jirtay niman wax boqorro ah. Boqorkaas marka horaba waxaa loo samaystay waxa dadka ku heshiiyo inuu isagu ku raaco, markaas dabadeed gartaasu inay sidaas ku dareerto oo boqorka guddoomiyo oo lagu kale qaadan jiray. Muddici markhaatiba la'yaha marka uu leeyahay: "Waa .. inay saas ku soconaysay", Dawoolka nin saxeexaya ayuu ka dhigan yahay isagu feermaynaysey. Waxa aynu xeer ku wada dhaqamo oo dhan inta rag sidaas oo kale u soo dejiyey illayn dembi weligii waa dhacayey yaa dabadeed madaxdii hore ee soomali ku sarranaysay arrinta dejiyeen, oo oon oggolaad madaxdooda ku oggoladeen waxba ayuu qorin oo yiri: "waa sidatan yaa lagu soconayaa", kan maanta dabadeed markii isticmaarka inoo yimid la rajiser gereeyey ee madaniga ah ee marna caaqiliintu qaadi jirtay marna dabadeedna ay qaadi jireen xafisiyada kale ee maxkamadaha ahi, waxna sharci bey yihiinnee waddoyin kale yeeshey waa wax waagaa hore ka yimid oo raggas dejiyey dabadeed ninkaan guddoomi yihii waxaa loo samaysanayaba haddo qawaaniintiisu dadka ha xidho ayey ahayd, ayaa looga jeeday ..

Axmed Nuur — Bal inta guddonka ahayd noo sheeg oo magacyada soomaalidu u aqoon jirtay noo sheeg.

Daahir Afqarshe — Somalidu waxay lahaan jirtay: 1) nin boqor ah, 2) nin garaad ahna waa lahaan jirtay. 3) nin suldaanna waa lahaan jirtay, 4) mid ugaas ahna waa lahaan jirtay, 5) nin islaan ahna wey lahaan jirtay, 6) nin wabarna wey lahaan jirtay, 8) malaagna

wey lahaan jirtay, 9) nin kale oo wayeel ah oo aan lagu sheegin magac derija ah ayaa jire. Nimankaa ninmba ayuu darajo ayuu leeyahay marka ay isu yimaadaanna way isku ixtiraamaan boqorka ayaana u sarreeya, inta kalena way hoos timaadaa. Marka waa jaranyaradaa weeye.

Axmed Nuur Fiqe Buraalow, maxaad ku dari lahayd intaas?

Fiqi Buraale Waxaan ku dari lahaa, magaacyadaas waxaa jira, magac kaloo kuwaas ka mid ah oo la yiraahdo Iimaan. Iimaankaas iyo Ugaaska waxaa hooseeya Ugaaska. Bil matal marka reeraha la eego soomaalidu siday u degeen, markay soomalida bilaabantay, dadna wuxuu samaystay boqor intaas qaarkood ay hoos galaan. Dadna wuxuu samaystay Iimaan intaas qaarkood ay hoos gasho. Markaas Iimaankaas ugaas iyo reerahaas magacaas ka tirsan waxa ay sii dhalaan oo ra'idaas waxaa la yiraahdaa Islow oo waxaa weeye reer boqor oo kale waa reer Imaam. Marka labadaas Iimaanka iyo boqorka yaa isu dhigmo oo labadoodaas waa labada ugu sarreysa, intaa kalena iyagey hoos yimaadaan.

Axmed Nuur Guurti odayaal ama gargayn waxa kan la yiraahdo maxay yihiin? Maxay garta ka qabtaan

Fiqi Buraale Gargayn waa rag khatar weeye waxa weeye nooc kastaba ha ahaade meeshi adag ama gar lagu qaadayo ama lagu diriraayo ama wax lagu gooynaayo gargayn waa rag bahallow ah oo la gaatay oo bela ka baqaynin. Guurti markii la yiraahdo laba nooc ayay u kala baxdaa. Bil matal, guurti ha loo saaro gartaa, waa la yiraahdaa. Guurti waxaa weeye shirkaa la fadhiyo ee shirgudoonka leh, nimanki garta dhegeysanayay iyagoo seddax nooc kale qaadaaya: qiraal wax laysu qirto, marqaatidu wax caddeeyaa iyo dhaar lays mariyo. Saddexdaas iyago loo eegayaa yaa misna haddii markhaati la waayo, qiraal la waayo dhaarta laguma degdego, waxaa la yiraahdaa: "Haddaan is suluxno maxaad ka qabtaan?" Suluxaas labo qodob baa laga eegaa. Mudduc iyo mudaacadeedi wixii ay ku doodeen, haddii daldaloolo midi ka muuqato, gartaa way ku xukumaan oo waxay yiraahdaan ... Waxaase la yiraahdaa:"Ilaahow eexana ha nagaga tegin aqoondarrana hanagu cadaabin".Markaas waxay u eegaan ereyadii halkaa ka dhacay mudducu iyo maddaac caleeyhi ay is yiraadeen yaa iyadoo garti iyo ereyadii la wada xasuusanyahay la yiraahdaa:"Nin kastee baa ka dhacdee gari laba nin kama wada qosolsiisa haddaan dhaartu iska dayno oo wax kale iska dayno meesha sulix aan ka soo qaadno marka leedihiin?".Hadday labadaa ninbey aqbalaan, nimankaas guurtida ah ayaa la yiraahdaa, ha loo saaro guddi arrintaas soo baardha, oo iyaga xaggaas dibadda wax ku soo yiraahda, dibaddaas ayey wax ku soo yiraahdaa oo wax ku soo gooyaan, waxay u soo celiyaan guurtidii iyo

guddoonshihii, hadalkii bay tiri waafinayaan, waxaana soo garanay sidaa iyo sidaa.

Axmed Nuur — Aan ku noqdo Daahir Afqarshe. Daahir Afqarshow guurti ka hadalnay, odayaashaa, gargeetina garannay, waxaa garasha u baahan garsooraha ama muddaca iyo garqabaha, garqab oo gaala ku dhaqo waa tii la yiri, garqabe ama gardiidka. Bal intaa ii kala sheeg.

Daahir Afqarshe — Waa laguu yaqaan, wixii ayaan maanto oo dhan wadnay dulucdooda intaa un bay ahayd labo nin oo wax loo qaybinaya baa meeshaan laga rabay Muddac iyo Muddaacli. Soma alida waxay tiraahdaa gardoon iyo garqabe. Labada kelmadood baa socday oo soomaali iska taqaannaa oo afka diinta ku soo aroortay oo weli geedba aannu niqiinnay oo marki kalana halkaan la soo doondoonanaa oo labada gacmood kula hayna

Axmed Nuur — Maahmaahdii ahayd garqab doon oo gaala ku darso qabiddu waa kaas. Halkaasa ka caddaa in ay ka horreysay oo laga horreeyay middatan muddaci iyo muddaca caleeyhi la ordayno oo iska qorannay. Faafidda ayaa laga dheereeyey mooye qabiddu wey jirtaa, Gardoon iyo garqabe labada eray wey jireen ee waa laga dheereeyey oo muddac iyo muddac caleeyhi baa xoogbatay

Daahir Afqarshe — Nin waxbuu sheeganayaa ninna waxbaa loo sheeganayaa. Waxaa la yiraahdaa: lureeb iyo naafi diid. Midna lur buu iska reebayaa midna nacfi buu kaa ka doonayaa. Waxaa loo danleeyey oo la dambeeyahay in labadaa la kala saaraa weeye dabadeedna weli in muddaca wixiisi ayuu halkaas ka caddaysanayaa guurtida horteeda, ninkii mudacacaleyhina halkaasu iskaga reebayaayoo. Labada dhexdhexaadkooda wixii ka soo baxay weeye waxa loo garnaqoya. Meeshana waxaa wax caddaynaya? Marag iyo millad, labadaa baa wax caddaynaya ee labada hadal ay wataanna aa tororog. Muddica wax ula yimaadaan markhatiyaal u caddaynaya waxa cayn ay ninka ku leeyahay oo ay ugu arooreen markaas gartu waa caddahay. Ninka kani muddacalaley ama wuxuu leeyahay haddii kaas marag waayo isagaa la dhaarinayaa, haddii kaas markhatiyaashiisa ku fillaan waayo qaarna wax u furo, markhaatiyaashiina dhigmaan mudici waa la dhaarinayaa muddacaleyhi markaa waa lagu leeyahay. Sida nimanka qawaaniinta degdegan ay tahay ee ay ku soconnayaan sida weeye. Waxaa kaloo jirta laakin maxkamaduhu oggolayn, muducu markhatiyaasha uu keeno in madacaleyhi la leeyaha wax ma ka leedahay kan oo ma eedeynaysaa oo haddii uu keeno waxyaabo uu ku durayo kan markhatigiisi in aan markhaati sax ah ahayn ay guddidu dhegeysandoonto. Waa mid ay reer Banaadir u yaqaanin bushin maxaad ku bushinaysaan? Markaa dabadeed ..

maxkamaduhu waa ku sii daayaan laakin guddidii dibadda wax ku akhirin jirtay marka uu sheego intaan maraggaba la weyddiin waxa uu ku busheeyo waxaa ka caddaan jirtay ama in ay ku sii daayaan markhati oo dhan, xoog ma ahaa waxa lagu sheegaya ninkaan lagu riddigayaa ama ay la wadaan runti oo laga joogaa kaa marag. Labadaaba waa dhacdaynta wax la weydiinta, waa in guddida wax is weyddiisaa. Halakan qudheeda maragga waxay qudhaadhu u qaaddaa, markhatigii baa kolley la dhaartii baa ka weyn oo ka xoog roon oo aan ninka geedka jooga aan dhaaranaynin, dabadeedna hadbow ayaa nin walba wuxuu yiri, iyagoo aan qorin ku soo celinayaan. Soo intaa ma aadan oran? Maxaa kalood ku daraysaa? Markii labadooduba ay wada yiraahdaan wey ii dhan yihiin baa la leeyahay "nagaka taga". Halkaasaa raggii ragga ahaa ka guu gaaraya ciddii dambiga ku caddaaday.

Axmed Nuur Cali Muddiirow adna maxaa ka oran lahayd labadaa eray gardoon iyo garqabe?

Cali Mudiir Horta sideedaba shirarka laysugu yimaado noocuu yahay ayaa waxkasto ku xiran yahay. Shirku in dacwo keliya laysugu yimid ma aha. Arrin daawadeeda ayaa shirka laysugu yimaadaa. Shirka laysugu yimaado markasta dadka ka soo qaybgalayaa waa in uu jiraa ow iyo ugaas, waa in uu jiraa waranle waa in maqaawirta aad sheegtaan ay jiraan. Waa inay niman aftahamayaal ah ee gabayaaya intaas oo dhan waa in ay jiraan. Dhinacyada iska soo horgeedo, waxa ay isku haystaan iyo waxa la doonaayo, haddii aan soo koobo, in soomaalidu demoqoraadi ahay in aan amar-ku-taagleen jiray, ow jiray wadaadkii, islowgii, waranlihii, akhiyaarti, maqaawiirta. Qof waliba oo shirkaas ku jiray lagu ixtiraami jiray xibinta uu ka ahaa shirkaas.

Fiqi Buraale Waxaan intaas ku dari lahaa horta marka ugu horreeysaa, garta marka la qaadayo, anigo ku noqonayo ku aynu ku soo gudubnay oo doodda ahaa, yaa waxaa la yiraahdaa:"anigu hebel waan gooyey oo ma galo gartayda, saddex ninna waa goosanyihiin: lughaye waa ninka xeer xididnimo …, naashaye waa ninka naas nuugo oo abti wax loo yahay. Leghayene waxaa la yiraahdaa waa ninka … doonka ah. Saddaxdaa ninna garteyda ma gelo. Waxaa misna jira xeer oo la yiraahdo haddii ay dubaado dhacdo ama ay dhacdo arrin kale oo taas ka weyn maxaa xeer ahaan jiray? Maxaa lay daaye? Bil matal 30 halaad baa lagugu xukumay qolodaas oo semenkaa iyo semenkaas laba caynkaas ah waxaanu xeer u lahayn in aanu kala qaadno intaas iyo inta qolo walba xeerkeeda baa halkaa laga xaqiijinayaa markaasaa xeerkaas wixii laysu gayn jiri baa laysu geynayaa. Markaas la oran jiray gartu ma jilib cadha? Jilib cadho waxay tahay wax markaa dhacay oo kulul oo laga yaabo in dembiyaal kale ay halkaa ka dhacaan, deg deg baa loo goyaa. Waxaa la yiraahdaa halkaas looga kici maayo wixii

laysku xukumi lahaa keena. Wuxuu yiri: ninkii garta jilib caro yaan qaadayaa … Jilib cadho waa arrin deg deg ah oo meesho loogo kala kacayo. Tii kale waxay leedahay xilliyo lagu bixiyo waxaa oo ama naq aa lala sugaa? Ama waqti reer uu ku dego ayaa lala sugaa? Laakiin had iyo goor nimankaa guurtida ah iyo guddoonshahaasu kama maqnaankaraan xoolahayaga meesha lagu bixinayo

Axmed Nuur — Daahir Afqarshow, erey kale ku xiran ayaa jira oo aan ka fogayn waa caddeeyaha garta ama doodaaga u doodaya muxun yahay usaguna? Bal noo cadday.

Daahir Afqarshe — Ninkaan doodaya waxa weeye ninka aan imminkaba u noqaanno looyar. Kaasaa waxaa la oran jiray: “Waxaan igmaday Cali Mudiir baan igmaday”. Mar haddaan igmaday Cali Muddiir ah looyer ama qareen marka waa ii doodayaa weeye, dacwaddii isagaa la wareegaya aniguna waxaan hayo ayan un baa mar mar u sheegaya, waan u toostoosinayaa illayn arrinta aanaa lahaa, sidaa u soconayso saa weeye. Marka aan arrinta dhammaynana, sida Fiqi Buraalaba uu sheegayey, arrinta marka jilib caro tahay, waxa kaloo uu oranayaa marka aniga hadalka iga dhammaado:”Ma kaa dhadaad baa?” Dhaadaddaa waxay wadataa wax ma kuu hareen weeye?. Mar haddaan iraahdo dhaadad, hadal dambe horta ma keeni karo, hadhow muddaacaleygana saan oo kalo ayaa loo weydiinayaa ilaa uu dhadadeeyo hadalkii waa naga xirmay labadaydaba. Haddaan wax ka xasuusanno wax buu tari lahaa, lama oggolo in midkayagaba wax la weydiiyo, sababtoo ah annagaa iska xirno oo niri waa dhaabad. Nin walbana waxa la leeyahy marka hore waa inta uu wax illaaba waxaa shardi ah in uu ku noqdo dacwadda labo jeer oo ka baaran dego oo dhammaysto wixii dabadeed uu yiraahda waa iga dhaabad waa xirmay wixiisa. Haddii wixii ugu darnaa ee dacwadda aan illawo, waan oodnahay, saaxiibkayga kalena waa la mid.

Axmed Nuur — Waxaan kaloon ku weydiinayaa wargure ama nawiile muxuu ahaa? Sideebuuna garta uga qaybgelijiray?

Daahir Afqarshe — Ninkaas hadalka ayuu werinayaa ragguna sida loo yaqaan badi ahaan, wan ku godladaa marka lagaa gurayo ee lagu leeyahay: haa, sidaasuu yiri. … kuu tahay hadalka oo loo gartay oo lagaa guraya wuu ka duwan yahay. Hadalka qurxintiisi wuu gocinayaayoo, siyaaba uu ka duwan yahay lama oggola kelemed aadaan oran uu ku kordhiyo kaagi uu buu werinayaa, ilaayn waa la wada maqlayee. Gocis uu baa la yiraahdaa. Arrinta wax uu ku leeyahay ma ay jirto. Lama oggolo in kelmad ku kordhiyo ama ka dhimo waxa aad tiri. Waa makrofoonka oo kale weeye oo dadweynaha gaarsiinaya.

Axmed Nuur — Waxaan ku noqonayaa Fiqi Buraale, Fiqi Buraalow ninka la yiraahdo naawilaha ama warguraha, magacya badan baa loo kala yaqaane, muxuu qaban jiray, dororkiisu muxuu kula ahaa?

Fiqi Buraale — Marka la eego ninka la yiraahdo codbaahin marka codbaahiyahasu si aan cajaladaa warka aan ku duubanayno ayuu u duubtaa hadalka markaas sida u gurayo ayuu misna sheegayaa. Naawiluhu, ninka la yiraahdaa, isagu halkiis agtiisi ayuu jooga, wuxuu isna kontroollaya oo aadna u eegayaa erey ma dhaafay mise ma dhaafin. Haddii qabasho timaaddo oo erey laysku qabsado isagaa markhaati la weydiinayaa ninka maawilaha la yiraahdo. Ninka kan la yiraahdana codbaahiyuhuna waa war gurihii hoobinaayey hadalka ee erey walba sidii loo yiri u sheegaaya oo markaa uu dhameeyo yuu oronayaa: “intii aad tiri intaas ma ahayd?”. Markaas ninkii ama mudici ha ahaado ama madaacaleeyhi ha ahaado midkastaba ha ahaade ragga midka uu ka guraayey yuu weydiini oo uu oronayaa: «“hadalkaagu intaa ma ahaa misa wax baa kaa dhiman” hadday wax ka dhimmanyihiin wuu ku sii darayaa wuu sii caddaynayaa.

Axmed Nuur — Waxaan ku noqonayaa Daahir Afqarshe, Daahirow waxaa jira erey ah maqaawiirta madasha ama maraweynta shirka, maxay yihiin ? Maxaysa door ay shirka ku leeyihiin?

Daahir Afqarshe — Labada kalmadood aad sheegtay waa laba kalmadoodoo wax aqoonta soomaalida derejo lagu ammaanaya oo in ay yihiin dadkii soomaalida warkaa halkaa ku dooday oo hogaamiyaashooda ahaa weeye, waa sharaf ay gaareen. Hawsha ay qabanayeen waa badantahay, taa aan maanta dhan soo wadday. Waxaa reer miyigu ku noqonyahay waa amarkooda, rabbi ka sokow.

Axmed Nuur — Qaladka ayey celinayaan? Marka guddicu wax ay soo saarto ayagaayaa loola yimaadaa markaasey garta ku raacayaan ooy leeyihiin garta sidaas iyo sidaas haloo wado ama ha loo baxshaa. Maraweyntu waa ka qaybgalin guddida oo marka hore shirweyynihii diray, guurtidii diray.

Daahir Afqarshe — Waxaa jirta, gar marka la noqo, “gar dabadeed baan guu-guu nacay” baa la yiri. Ninka garta lagu xukumay inuu guuguu keeno oo cawdi oo yiraahdo guddidii wax igu xukumtay waan gowriyay oo hadallo caynkaa oo kale dhaliilo yaa caada ah in ay soo baxaan. Marka maqaawiirta tan aan joogin iyo kuwii joogay ra’yigoodii, illay waa ka weyn yihiin dadka kan guuguu laha, marka ay dabadeed is raacaan oo yiraahdaan gartaa sida loo qaaday waa asiibantahay, marka meeshii hadal ma jiro oo guuguu ma laha. Hadiise kuwaasina ku raacaan in meshii qalad ka dhacaday guddidii hore, waa in dabadedina arrintii dib loo celiyaa oo gar dambe la qaadaa, oo abil oo kale

ayey xisaabsan tahay. Guddidii hore oo guurtada loo saarta la yiri waa laydin gowriyey xeerbeegtayaal bey ahaa yeen eexashaa ka muuqatay.

Axmed Nuur Haddaba waxaynu u noqonaynaa markhaatigii, waxaynuna ka billaabaynaa Fiqi Buraale inagoo kala saarayna “markhaatifur iyo markhaati-bishin”

Fiqi Buraale Markhaati waa weeye, waatayna horey u sheegnay, garti waxaa lagu qaadaa saddex: qiraal, markhaati iyo millad oo dhar ah. Markii la waayo qiraal markhaati baa la doonayaa. Markhaatigaas waa la dhaarinayaa marka ugu horreysa. Markaa la dhaariyo waxaad ka ogtahay arrintaan lagu wayddiinaayo waan ahayn inaadaan ku darin, marka intaa lagu weyddiyo. Ninkii muducii lagu ahaa waa dhageysanayaa, mid kastaba ha ahaa dee kii markaas markhatida keensaday, illayn markhaatigaas waxaa leh ninka mudduciga ahaa oo wuxuu rabaa in uu wax ku caddeeyo, ninkaas haddii uu ku markhaati furo. Ninkaas isagii, markuu intaas dhameeyo yaa la oronayaa: waxaad ka oronaysaa maa jirtaa? Kii muddaacaliyihi baa la leeyahay oo ku go’daa markhaatigaas iyo wakhtigaas ninkaas igu furay sagge buu joogay? Yaa la joogay? Xaggee buu maqaayey? Sedee bay ahayd ? Guddidiina waa dhageysanayey. Ama xagga diintuu ka soo gelaayoo wuxuu oronayaa: “ninka kanu maba tukado. Ninka kanu waa khamarji. Ninka kanu waa nin wareersano sufti ah oo aan markhaatiba gelin”. Saasuu u burinayaa. Markaasaa la oranayaa: “in uu saas yah markhaati keen”. Markhaatigii uu keenayaa. Haddii intaas ay ku caddaato, markhaatigii waa furaayaa.

Axmed Nuur Shuruuda kale oo markhaatiga la shardiyayaa ma jiraan? Gabdhuhu ma ka qayb galaan markhaatiga? Ninka aan qaan gaarin ma ka qaybgeli jiray? Shuruudo kale oo markhaatiga lagu xiri jiray ma jiri jireen?

Fiqi Buraale Haa, horta anigu ma waxaan maqashiisanahay misa waxaan weli arkin? Waxaanse maqashiisanahay haddii xagga diinta loo eegaayo haweenku labo iyagoo ah nin bay u dhigmaan, waa marka rag la waayo, mase arkin naag la weyddiinaayo markhaati anigu ma aanan arkin hadda ka hore. Ninka aan qaangaarka ahayn markhaati maba gali karo illayn qaangaar maba aha. Dembigiisi waa la qorayaa, marhadduu 15 gaarin.

Axmed Nuur Ma waxaad leedahay ninka markhaati laga dhiganayo waa in uu lab yah, waa in uu caaqil yahay, waa in nin wax kastah yahay, waa inuu qaan gaar yahay.

Fiqi Buraale Waa in uu miirkiisu dhan yahay, oo misna ahayn nin waalan, waa inaan lagu aqoonin wax ceeb ah ama beenaale ama shahadda suur ama arrimo badan waa in lagu aqoonin.

Ninkaasu waa nin dhan oo tukada oo Ilaahay ka baqa diintana ku wanaagsan qaan gaarn ah.

Axmed Nuur Caliyow maxaad ku dari lahay arrintaas.

Cali Mudiir Waxaan ku derayaa oo keliya, labada nimoodoo is haysata, ninka wax lagu sheeganaya weliba iyo ninka marag furaya ee xiriir qaraabanimo iyo wax ceenkaas ah, seeddinimo iyo naashay wixii la sheegaayey inuuna lahayn, oo marka horba la durin. Anigu durid baan oran lahaa inta aad soo wada sheegteen iyo kuwan qaraabnimada haddii lagu caddeyo markhaatiga.

Axmed Nuur Waxaan ku noqonayaa Daahir Afqarshe, Daahirow gartu waa noocya badan tahay. Inta aan ka xasuusnahay waxaa jirta gar la yiraahdo gar cadaabo waxaa la yiraahda gar sokeeye, waxaa la yiraahdaa gar luggooyn oo gar layku luggooynaya aan jirta, maxay kala yihiin, maxaad ka taqaanaa garaha laysku dibin daabeeyo. Gar magaalo mid yiraahdaa ayaa jirti maxaad adigu ka oran lahayd?

Daahir Afqarshe Anigu gar gar uu baan u aqaanaa, ragga qaadayana guddi baan u aqaanaa, laakin caadada kala guduban yihiin dhul badan waa ay jirta. Waxaa jira dhulka soomaalida aan markhaatiga lo dhaarinayn, meel teg goobo saas oo kale loo jeexo la yiraahdo halkaa war istaag markhaatigu, isagoo xariiqo hareerihiisi tahay, qoobihii oo dhex istaago oo meelna dhaxag gacanta midig ku qabto, kolka dhaxaga qabtaana dabadeedna walla laguna dhaariyoo waxaa la yiraahdaa: “waa dhagax waxa aad haysaa, ma dhalo, oo ma dhiiqo inaadan arrintaa wax lagaa weyddiinaayo beenka sheegaynin ma tii Ilaahay sida dhaxa kaa dhigaa baa?” Xariigdatan xero oodan baad ku jirtaa weeye. Axdi baad ku jirtaa. Mar haddiin dhaho sidaa u hayo ninkaas horta been ma sheego. Markaa dabadeed isinkii Ilaah lagu dhaaran lahaa oo taasaaba kaga kulul oo markaasaa iskurbaynayaa oo kolaasaa saas lagu weyddiinayaa. Dad qaarba iska yar jaahil ahoo, hadalka Ilaahay lagu dhaarinayo magac Ilaahay kala xoog roontahay naagtoo laga xila fursiiyaa.

Ninku haddaanu arkaan islaamka iyo lixda iimaanka iyo labada asxaanka aanu aqoonin lama garanayo in uu gaal ka soo haray iyo inuu weli nin muslim ah yahay, illayn saddex iyo tobankaa buu islaamku soo galay. Haddii la weyddiiyo la yiraahdo: “ ma taqaanaa?” oo saddexdaa iyo tobanka ka bixiwaayo ninkii markaa lama garanayo in uu islaam yahay oo garta tan oo wax lagu dhaarinayo wax ka yaqaanno iyo in kale. Waa duran yahay oo waa lagu ceebeynayaa, salaaddu waa kadaalik. Waxyaaabihii uu iminka Fiqi Buraale uu sheegayey waa kadaalik. Naas nuug lughaye iyo kuwaasani waa ka mid. Waayadii hore ee soomalida miyiga joogtay waa iska ilaalin badnayd markaan iminka magaalooyin isoo

buuxisay. Waxaad ku garaanaysaa, nin baa marag loo keenay markaasaa la yiri: “ninkakan maragiisa maxaad ku duraysaa?”. “Waan duraaya”, buu yiri, “ninkakanu waa tuulo joog, magaalooyinka tuuloyinka ah buu jooga, ma hadduu tuulo joog yahay oo tumn qaato yahay oo uu tomanka ari cuno, markhaatiba inuusan geli mudici markhaatibaan ah”, buu yiri, “nin dhan ba ma aha”. Hadda tobanka ariga waan cunna hilibka laynoo googooynaayo oo wax allaale wuxuu kala yahay ma naqaanno jafta waan ka saarna, haddaan ku qadaynaynaa. Tuulo joogno waa wada nahay, tumin qaatana waa wada nahay oo nin waliba meel buu biil ka qaataa oo waa meel buu ku xiran yahay. Marka ikhtiyaar ma leh. Marka dabadeed magaalooyinka aan u cammirnayn, ninkii caynkaa ahaa waa la … mar haddii uu tobanka ari uu cuno oo uu tuulo joog yahay oo tumun qaato yahay, dee ninkii nin dhan ma ah. Gurtidii kiiska qaadaysay “war naga tag”, bay ku tiri, “oo nin dhan mi ihidee”.

Axmed Nuur Fiqi Buraalow garta la yiraahdo gar cadaawo sidee baa loo gar qaybshaa? Garta la yiraahdo gar sokeeye sidee baa loo gar qaybshaa? Mid saddexaad baa jirtaa oo la yirahdo gar-lugooyose sidee baa loo garqaybshaa. Mid kale ayaa jirtaa oo la yiraahda gar magaalo, waa tii Daahir Afqarshe uu ka cabaaday reer magaal marag ma galo!

Fiqi Buraale Sida aad u tiri aan u horreysaa iyo gar cadaawe. Hadalka iyo dhihidda iyo wax ogaalnimada, waxyaabo fara badan oo lagu kala xishoodo ayaa jira oo shirku aanan dhageysan karin. Garta cadaawo markay tahay, gartaadaas waa midaan u jixinjixaynin ninka garta idiinka dhaxaysa, waxaad doonta baad oranaysaa. Laba nin yaa waa garramay. Nin baa awrka dhumay, marka awrkaa ka dhumay baa 5 sanadood ku dacwoonaayey, markaasaa labadii nin awrka isku hayey, ninkii awrka haystay markaa iyo ku mudduci lahaa oo lahaa “anigaa leh”, ayaa ninba nin egmaday ninna waxaa la oran jiray Barre Afqas, ninna waxaa la oran jiray Abaar. Markaasaa la yiri maanta waxaanu tegeynaa oo gartii ku geleynaa, guddidii ay tiri gurigii Abaar, markii meeshi la tegey yaa Barre Afqas istaagayoo yiri “Abaare rug ma leh oo raas ma leh oo raro qoyan ma leh garina kuma baxdo meel caynkaas ah”. Abaar baa kacyoo wuxu yiri “af waxaan nacay markuu run waayey oo rumay waayo oo raqas yeeshey”. Markaas garta cadaawo taasoo kale lagu kala xishoon wixii la doonoba la yiraahdo. Garta la yiraahdo gar sokeeye waa gar aan lagu tiigaalin, maxaa yeelay waxaa la yiri: “tol sidi xidid loogu wada hadlaa (loo hadlaa) tol ma noqdo xidid sidii tol loogu wada hadlaa xidid ma noqdo”, oo sidaasaa hadalka loogu kala xishoodaa si tartiibaa logu wadlaa, hadalka layskuma tiigtiigsado. Gar luggooyo, mid qura un baa ku soo gabagabaynayaa. Reer Kismaayo waxay yiraahdaan : “Runha sheegin, beenna ha sheegin, waxaad sheegtana ha waayin”.

Taas waxaa weeye soomaalida qaarkeed yaa markay rabaan inay nin xeeladeeyaan iyogoon xaq ku laheen yey dacweeynayaan. Sidaa dayuuradda uga haro ama baabuurka uga haro ama doonida dhoofayso uga haro ama dhibaatooyin badan ay u soo gaarsiiyaan iyogoo xeel wada, marka luggooyo taasaa la yiraahdaa. Miyi kama dhacdo (Caluula iyo bey ku badan tahay) waxay u badan tahay magaalada.

Axmed Nuur — Iyadoo lagu jiro gartii waxaa jira erey ah “gacanqaad baan geystay”. Daahir Afqarshow ereygaa ka warran. Garta iyadoo nin hadlayo mudac ama muddacaleeyhi isku doodayaan baa nin intu isku taago kii muddacaleeyi oranayaa “gacanqaad baan geystay”. Maxay tahay waxaasu?

Daahir Afqarshe — Waa laguu yaqaanaa “gacanqaad baan geystay”. Ninkii markii uu doodayey ayaa kalmaddii ka dhacaday, illayn waa nin xiisad ku jira ee, kalmaddaas waxaa laga yaabaa inay wixii uu dafinayay, kolkuu haddana warramayey wax xoogaa wax yar ka mashiigiyey arrintii dhanna wax ka daffirayey dhanna wax ka sheegay. “Bal marag ahaada”, buu yiri, “gacanqaad baan geystay”, oo dabadeed qiraal bey iigu jirtaa weeye. Markalena way dhacdaa, meeshii niman maqaawiir ah baa ka hadlayee, haddii hadal qadab ahoo, ma garanaysaa, kan lagu leexinayoo caayad ku sabsan oo ciribkiisa waxyeelayo kaana gacanqaad baan ka geysanayaa, oo waxbaa meesha ii yaalo ii galay oo ninkakan ii qiray weeye, oo xaal baan ku leeyahay ninkii weeye, oo kalmadda caynkaas ah markuu taabtay weeye oo sharaftayduu wax yeelay.

Cali Mudiir — Marka hore “gacanqaad baan geystay” maba aqoonin, laakin waxa igu soo dhacday markii la fasiray afka carabiga waxa la yiraahdaa “nuqato tasxiix”, “point of order”. Adduunka dhan waa isla qabaa, macnaha waxaa weeye hadal aad wax ka qabto oo lagugu leexiyey ama jidka laga weeciyey amba la qasay ayaad rabtaa in aad tiraahdo maya waa hallaysan yahay, afaf kalena waa la qabaan.

Fiqi Buraale — Ereygaa la yiraahdo “gacnqaad baan gaystay” waa sida ay odayaashu ay yiraahdeen maxaa yeelay wax adiga kaa qarsanaayo oo marka hore lagaa deddayey ama mowducii ahow ama maddacaleyhi ahowoo yaa ninka soo baxa gartasaa loo qaadaayano waa mid aan markhaati loo haynin, dhaarna aan weli la gaarin, laakin dooddii soconaysay yaa ninkii hadlaayay ama muducigii ha ahaado ama maddaacalayhi dhibaati u keenayo isaga nasabnimaadiisa wax ka sheegayoo, korkiisa wax ka sheegayoo cay ah ama ha ahaato wax qiraal noqonaayo sinifkadii ay uga soo baxday halka, halka wuxuu oranayaa maqaawiirti meesha googtay u oranayaa: “gacanqaad baan geystay idinkuna markhataa uga tihin”, waana fariisanayaa. Marka hadhow dooddiisa dambe buu ku darsanayaa.

Axmed Nuur — Waxaa jira ereyo la yiraahdo sed, xaal, sabeen, faras iyo wixii kaloo lagu sii dari karo.
Daahir Afqarshow bal noo fasir ereyadaas waxa ay yihiin.

Daahir Afqarshe — Intoo dhan waa isku wada xaal oo waa kala waa weyn yihiin oo kelmadaha kan qofka ka dhacay yaa kala miisaan weyn. Sed muxuu yahay? Sed baa ku raacay waa xaalba ku raacay. Sabeen baa kugu xiran wixii oo dhan waa meelkadhac wayna kala sarreeyan. Waxaaba jiray laba nin oo nin baa naag doonay, naagti buu ka noqday markaasaa xoolihiisi oon u wada dhammaan oon la wada siiniin ee xoogaa yar reerkii ku harsanyahay yaa adeerkii ina adeer oo ay aabbihii ilma adeer run ah yihiin, kii naagta xara u doonay xinqooqay naagtiibuu dab raacay marka ninka naagta u doonantahay faraska bixiyey soo ma aha naagtii. Labadii nin jiq bay isku yiraahdeen, waaba isku soo shireen, labad qaaday toddoba faras baa la saaray ninkii naagti boobay, naagtiina isaga baa loo daayey, illayn mehersayey, ama afartan halaad. Maxaa loole jeeda? Raggaasaa lagu xurmaynayaa. Marka fardihii baa kala qiima 2 toddobaale iyo 2 lixle iyo 2 shanle iyo mid afarla ah ayey noqonayaan.

Axmed Nuur — Annagu xaggayagu magaluu waxaa jiray farasku labo uu noqday: faras magaalo iyo faras. Faras magaalo waa xoogaa lacag ah waa shan qarshi iyo meelahaas. Farasna waa faras weyn oo kaa aad sheegeyso oo todobo boqol iyo afarta gaaraayo.

Daahir Afqarshe — Marka oo kale baa loo xukumaayoo xeerka marka farduhu quwiga ahayeen iyagaa lagu qiima goosan jiray. Markaa maxaa la sameeyay? Kolkaasaa la yiri ninkii xoolihi aan iska dhammayn ee faraskii gabbaatiga ah qaatay, “adiguna dambiile aa tahay”, baa la yiri, “waayo labada nin ah inaad isku disho, gabadhaada tan ee Barni ah ee kuu joogtaa kan dambe ee faraska ka qaaday u meheri”. Waa lagu xukumay, guddida baa ku xukuntay. Wuu meheriyey, hadda wiilasheedaa taag loo la’yahay oo rabshaddooda iyo guuldaradooda lawo naqas laysku wey diishay. Yarad qaaday laakin caruurtii baa fidno noqotay.

Axmed Nuur — Fiqi Buraalow bal kala saasaar ereyadaased xaal, sabeen, faras waxaa suurtowda in gobollada soomaaliyeed in ay ku kala gedgeddiisan yihiin. Laakin inta isu dhow dhow yihiin intaasaa caan ah oo la yaqaanaayo oo ninka garta ku toosowdo ama garta lagu xukumo ama garta ku go’do ayaa lagu xukumi jiray. ayaa la oran jiray intaasaa la raacin jiray ama xoolihii laga qaadi jiray. Bal noo kala saasaar miisaankoodu ay kala yihiin.

Fiqi Buraale — Mid kale aan ku daroo. Waxaa la yiraahdaa guraado caano

ma daadiso. Gobolkaas Kismaanyo ayaa badiba loogu isticmaalaa. Ninkaas waxaa weeye nin la xukumay oo xaal lagu helay. Waxaana laga gowracaa hasha u irmaan ama awrka uu raranayo. Waxaa la yiraahdaa muraado. Waa loga muraadayaa. Markaas intaasoo dhan waa wada xaal xumay laakiin mid walba xeer buu la egyahay. Waxaa jira marka faras magaalo. Ninbaa hadlayo hadal baa ka fakanaayo kolkaasuu oranayaa “xaal” cimaamad buu ku tuurayaa markiiba “faras baan kaaga degay” yuu oranayaa. Islamarkaana waa loo soo celinayaa ninkii cimaamaddiisa. “Waa qaadanay waana naga ceshtay” buu oranayaa. Sed waxa weeyey sidii loo hadlayey “sed baa ku raacay”, sida Aw Daahir uu yiri waxa weeye “xaalbaa ku raacay”. Xaal baan ka bixinayaa buu oranayaa markaasuu cimaamadda tuurayaa. Waa yaryahay xaalkaas sabeen dhowr nooc bay gashaa xaal, mar waxay gashaa dhaar logu dhaaranayo qofka sumal iyo sabeen. Sumal iyo sabeen marka la yiraahdo, calaashaan Cali Mudir baa si fiican noogu macnaynaya doonaye, ama waa lagu ducaystaa, ama laba reer oo wax kala galeen, oo tasuma waa gooni, ama waaba lagu xukumaa qofka, sabeen baa lagu xukumay qofka oo xaal weeye. Sabeentu wey qaybsantaayo oo xaal kali ah kuma weeye. Sabeentu wey qaybsantaayo oo xaal kali ah kuma go’do, nooc badan bay ku kacdaa. Soomaalidu waxay tiraahdaa “oodi qaadir iyo jiidir waa isla gurigayn”. Tan kale oo magaceedu uu ahaa muraadayn. Muraadayntaas waa muraado. Muraada waa xaal weyn weeye, sabeentay ka weyntahayoo waa ninkaa laga gowracayaa, muraado waa la muraaday weeye. Waxaa laga gowracayaa ama awrka ama hasha irmaan saca irmaan ee ugu nafaca badan reerka. Oo taasaaba ugu sii daran. Kuweer waaba la soo celceliyaa, kuwa kan waaba la gowracayaa si uusan ninkaas ugu noqon dhibaatada uu gaystay. Tan kale ee fardaha xaggeeda wax waliba qiimay lahaayeen oo markii hore, semenka maanta aynu joogno iyo tii hore ee jiri jirtay oo lagu kala qaybsan jiray way kala duwan yihiin. Tii hore xaalkeedu wuxuu ahaa mid calaashaan gooni ah miyiga ku ficna ku facluuqa, waxaa markaas la bixiyaa ama buntuq ugu fiicna ama faras ama gabar yaa la oran jiray xaal baa laguu siiyey. Gabadha afkii baa oran jiray xaal baa laguu siiyey. Gabadha afkii baa lagu bixiyey, laakin yarad sidii baa loo bixiyay gabar gala jooga baa la yiraahdaa. Waa qodab wey oo loo adkaysan waayey. Markaas sidaa aynu ku maahmaahay ee calaashaan “oodi qaadis iyo jidis waa isla guri geyn” intaasoo dhan ha kala waaweynaadeen oo midba nooc ha ahaado, laakiin waa wada xaal, xeer guud.

Axmed Nuur Waxyaaba kaloo sedka soo raacaya ayaa weli jira, Caliyow iga raalli ahow xoogaa waqtiga inaku soo gaabanayo, waxaa jira waxyaabo jira waxyaabo badan oo sedku raacayo ayaa jira. Bal Cali adiguna maxaad ku dari lahayd.

Cali Mudiir Hadallada qaarna waan ku daraa qaarna si kalaan u aqaanaa. Horta xil iyo casaaro anagu waan isticmaallaa, ereyadaas aan ku dari lahaa. Xaalka meeshiis xil iyo casaaro oo kuwii yay la macna yihiin. Laakiin erayga sed la yiraahdo xoogaa aniga weyga duwan tahay. Sed iyo baad dadka gobta ahaa leh yaanu niraahnaa marka xil iyo casaaro ayaa jira, laakiin sed, sedka dadka gobta ah ayaa la siiyaa, gobtana waxaanu u naqaannaa dadka boqorada ah.

Axmed Nuur Horta xil iyo caasho, annagu waan isticmaalnaa ereyadaas, aan ku deri lahaa xaalka meeshiisa xil iyo casaaro. Kuwii ayey la micna yihiin (sida muraadi). Laakin ereyga sed la yiraahda xooga aniga waa iiga duwan yahay. Sed iyo baad gobta oo annagu u naqaanno boqoradda ayaa la siiya oo shaqo kuma leh xil iyo casaaro oo la mid inta soo sheegteen.

Axmed Nuur Caliyow horta casaarada waan ku waafaqney qolooyinka reer magaaladana wey leeyihiin waxay yiraahdaan casaaro ama muraadays oo waa iskumidoo, aad iyo aad baa qofka wax loo gaarsiinayo, khasaaro weyn oo waqdhaa caam ah baa laga dhigayaa, maalintaas waa la khasirayaa. Midda sedka, horta annagu micna badan buu noo leeyahayoo, sedka xijiga laga qaataa jira oo, sedka boqorka la siiyaa jira oo sedka tumaalka la siiyaa jira oo sedka gabadha la siiyo, sedka Faduma Rasuulo oo waa badanyahay, laakin xagga garta waa kan ugu dhow oo marka horaba layaba lays dhaho “sed baa ku raac” yacnii xaal baa ku raacay.

Fiqi Buraale Midkale aan ku daro. Marka gar la qaadayo, koonfur iyo waqooyi laba nooc bay leeyihin. Mid waa sal bacaad baa lagu qaada. Waxaa kaloo jiro laba kale Axmed Nuur baan maanta meel igaga dhacay oo dacwad baan u qabaa. Waxaweeye ama gar sokeeye ama gar macrifo wax ah gogoldhig baa la yiraahdaa. Ninkaas kharash badan buu gelaa ilaa uu gogoshaa dhigana gartiisa lama qaado. Waa xeer iska dhigan weeye, halkii aan bannaanka iska dhegan lahayn.

Axmed Nuur Waxaan rabay in aan ku weyddiiyo, garta waxaa lagu qabtaa dhowr meelood ama meel oo xeran baa lagu qabtaa ama shir furan baa lagu semeeyaa. Marka waxaan mooday in ay jiraan labadaan nooc iyo midka gogosha.

Fiqi Buraale Waxaa kaloo jira mid kaloo, waqooyi garta marka la qaadaayo “hebel baan gar u leenahay” labadii baa soo xaadiraya. Waxaa la leeyay hagarbay keena. Hagarbeydaa labadii ninba wey dhigayaan. Hadba kii garta helaa ma ahee kii kale ayaa laga qaadaya (waa taqsiir). Hagarbey baa la yiraahdaa ulajeddadeeduna waxaa weeye dadka dacwadaha badan ha ka joogsada. Gogashaa la dhigaayan oo ninka kharajka badan bixinayo ha ka joogsada weeye dantu. Qofkii yiraahdo maxaa garta la ii qaadiwaayey. Waxaa lagu yiraahdaa “maxaa

gogol u dhigan weyday?”

Axmed Nuur — Waxaan halkaan ku soo koobaya oo aan ku soo ururinayaa oo warka aan ku soo gaabinayaa. Shirka waxaa lagu qaadaa geed waxaa loo qaadaa shir furan, waxaa loo qaada shir xiran, waxaa lagu qaadaa gogol waxaa laga qaadaa hagarbey yaa laga qaada marka garta la qaybinayo, intaas ayaa garta lagu qaybiyaa. Waxaa jirta xujafur, xeerdhig, tixraac, waxyaabahaas ayaa iyaguna jira. Waxaan moodayaa in uu warka noo soo gabagaboobaya, waxaan haddana ku wareejinayaa warka Ciise. Ciise adigana maxaad ku deri lahayd doodda meesha ka socota?.

Ciise M. Siyaad: — Axmedow anigu hadal iima furno inta odayaasha tiri uu baan kuu raacsanay odayaasha ayaa iga waaya aragsan.

Axmed Nuur — Daahir Afqarshow waxaa jirta wax la yiraahdo ergo oo iyaguna gartaa dowr ku leh oo garta soo galaysa. Waxaa jirta iyana galliin oo ergada la mid ah oo ka duwan. Labadaanba oo garta ay ku wada lug leeyihiin inoo kala saar.

Daahir Afaqarshe — Anigu ma aqaani galliin. Ergo waxaa weeye, tan la yiri, ergo araggeeda xamuuran. araggeeda ay xamuurantahay. Iyadoon waxba la weyddiin oo maxaad u socoteen la oranin yaa imaantakeedu hadlanyahay, waayo waa wax laysla ogyahay, waxay ergadu u timid in wixii dadka ka dhaxdhacay masaa maxaad lagu dhammeeyo oo hadday adduunyo la celiyo, hadday tahay qoomaanna arrintii laga heshiiyo oo lays cabsiiyo.

Axmed Nuur — Oo maxaad leedahay, sida mahmaadu leedahay saddex siday wax u ogtahay uma warranto. Oday reer u weyn iyo umuliso iyo ergo. Maxay macnaheedu taas tahay?

Daahir Afaqarshe — Waxay tahay mid waliba si uu ogyahay haddii uu kashifo mashaqo kale baa imaanaysaa. Mid uun ka soo qaada sida ergada. Ergada markay timid baa dabadeed dhalliiyaro miiray ku qamaamtay, oo yiraahdeen: “aan layno eyda, ayda laga soo gooyay”. Markaasay dabadeed weeyeelladi ula baxeen dhengado “eydu eyda dhashay khaataa laga joogaa” dabadeedna markaas kala eryeenoo kala xabiseeno baleeyecno. Markaasaa ergadii duqowda kala meel fariisisay, waa sooryeeyanoo waa wanaajiyeeno. Dabadeed halkaasaa arrintii la dhaxgaleyoo waa lagu heshiyayoo. Ergadii iska .. arrinti lagu heshiyayoo. Ergadii oo maqsuud ah ayaa tagtay. Hadday yiraahdaan: “dhallinyaradii reerkaas waa nagu soo qamaamtayoo dabadeed qirqir baan galnay” dabadeed colaaddii halkeeday ka oogmaysaa. Wixiiba waa qariyeenoo waa dabooleen, waxay yiraahdeen: “Wallee dadkaa halkaa ugu tagnay .. awalba waan is garanaynoo kuwaasaa kala

kulmay?". Wixii dhan wey qariyeenoo waxay doonayaan in labadii dadba ay isku tallaalaa. Dee haddii ay sheegi lahaayeen soo laysma dileen. Umulisadii waa la mid. Marka kuwaas ceeb daboolka ah, waxa dadkaba daadihinaya waa dadko ceenka oo kala ah.

Fiqi Buraale Intaa waxaan ku dari lahaa, labad ergo iyo galliin. Ergo ayaa ugu horreeyee, waxaa la yiri: "ergo wixii la yiraahdana way maqashaa, wixii la siyana way cuntaa". Waxaa kaloo la yirahdaa: "laba waxay ku wanaagsan tahay aamuska, laba socodka, laban qaylada, labana culayska". Waxaa la yiri: "cirka roobka soo curtaa iyo culimadu socodkay ku wanaagsan yihiin. Maxaa yeelay roobka meeshuu ka soo curto haddii had iyo goor taaganyahay dee la doogsan maayo ee waa inuu socdaayoo baa la yiri oo ummadda wada gaaraa. Wadaadna baa la yiri meeshu wax ka barto ama uu jogo waa inuusan taagnaanin, waa inuu socdaa, taasoo looga dan leeyahay diinta fidinteeda ha gaarsiyo iyo laba cashaan isla soo baxday is weheliya. Laba wax iskuhaysta kala saaryaa, mid xanuunsaday markaas nafta ka baxayso gunaanadyaa ama yaasimiyaa, culumada socota waxay ku wanaagsan tahay laba isla socota, baa la yiri. Labana waxay ku wanaagsan yihiin baa la yiri qaylada: odayga reerka u weyn iyo riyaha labaduba qaylada ayey ku wanaagsan yihiin baa la yiri. Taasoo loola danleeyahay, odayga markuu soo socda haddaan la oran odayga baa soo socdeen alaabta ururiya oo la yiri yuusan nagu qaylinee, reer lama wadi karo. Riyuhuna markhaati aad waxar galinayso iyo ri socinayso iyo orgi qalaadaayo aad ka weydo wey guran yihiin, meeshaas ka leexo jilaad baa haya. Waxaa la yiri labana waxay ku wanaagsan yihiin culayska oo nagta baa la yiri oorida ah iyo hasha reerka ugu irmaan geelu leeyahay, labadaba waa inay culusyihiin baa la yiri. Waxa weeye naag nin qabo yaa markay qadaada ku siiso, iyadoon meelna dan u lahayn, fudeenkaa loo diidayaa, yaa mid soconaysa ay tiraahda: "Naa heblo xaggeed u socota?". "Waxaan gaarayaa heblo ama waan ku raacayaa i sug" markaasay ninko dusha kaga xirdhaa albaabka. Marka waxaa la diidayaa inay saas u fududaato ee waxaa la doonayaa ninka qaba caw iyadoo falagsatayaa daabac samaysatayaa arrin kale haysatayaa meel ay uga dhowdahay oo hadduu wax u baahdo uga dhawaaqi karo, uga yeeri karo waa inay joogtaa baa la yiri.

Axmed Nuur Waxaad leedahay ninkii gabyaaga ahaa wuxuu yiri: "cag fudeed ma fiicno haween culisi waa u dooree arjedana hadday xuntahay ceebta adigaa leh"

Fiqi Buraale Waa kaa, hashana baa la yiri waa tan geela tagaa meel fog tagaa, markaas waxa la soo carraabiyaba meel xero ah la gu soo shuba goor caweesin ah, waa loo caweysimaa geela u soo goddi baa lo yiraahdaa inanka marka hasha madi ahe ee

culus hable hable markii la yiraahdo hadba way faarumaysataa oo ceebay leedah mar dambe yay kudaa, markaasay haruubyaal buuxisaa oo inama badan haruub kuu deeqdaa. Tan fududina markiiba hebla markii la yiraahdo firi tiraahdaa cad iyo caano ma leh, taana saasaa loo yiri. Laba baa la yiri aamuskay ku wanaagsan yihiin baa la yiri: gabadha gayaanka doonaysa ee guriga joogta, la doonimaayo in qayladeeda dibadala laga maqlo, gayaanku maqlo ee waa inay gabar edeb leh oo aamusan oo reerkaa looga jecla laakin haddii qaaq ay tiraahdo loo soo goglan maayo. Inta kale ma wada xasuustiyee waxaan ku waday ergadii. Ergadi meel bay ka wada yimaadeen. Dad calashaan wax ka dhacay ama godob dhex martay ayey ku soo kaceen, markaasna reerka isaga ah ee arrintaas sameeyey wax xumaan ahoo u horreeyayoo utun ajoo dheeri maynan jirin laakin qolaa soo duushay oo geel bay iga dhaceen, markaasay erga loo soo diray. Fidnadaasna waxay ku kacday wax yar oo saas u weynayn, marka ergadii qaylin mayso. Way imanayaan “salaamu caleeykum”, “wa caleykumu salaam” markaa gogol baa loo dhigayaa. Marka waa taa la yiri: “ergo waxii la yiraahdana wey maqashaa, wixii la siiyana wey cuntaa. Marka hadday qayliyaanoo yiraahdaan: “haddaan saas iyo saas naloo yeelin saasaan yeeleynaa”. Markaa waxaa laga yaabaa dhalinyaro intay soo kacdo gowdo laga siiya. Waxaa kuu timid gallinki, saan u aqaano waxa weeye: anigu waxaan u qabay Ciise xumaan baan ku sameeyey uusan iga gelin markaasaa laygu cisaarayaa, ma anaaba isgaranaya, “u gallin” baa ley oranayaa, gondahaan qabsanayaa waxaa oranaya u hayo “raalli ahow” baan oranayaa intaan gondaha qabsado. Maxaa yeelay soomaalida waxay tiraahdaa “walaalkaa haddii candhuufadaa gaadho gacantaada hala jirto”. Maxaa yeelay gacanlayda saas ulama kacinee raalli ahow, meel baan ka dhacayee raalli ahow, meel baan ka dhacayee raalli ahow. Galliin kaasaa la yiraahda.

Axmed Nuur

Anigu taas baan ku waafaqsanahay naag baa buraanburtay oo waxay tiri: “gobihii geel laga dhac gaaladiina waa ogta bal yaa u galliin ah oo loogu gelahayaa”. Yaa galliin macnaa dadka hayanaya oo tegayo oon la dilayno goortay cadowga qaladaas ay u tagaan aan wax la gaarsiinayn.

Cali Muddir

Aad baan ugu faraxsanahay waana ku raacsanahay. Ergada saa u sheegteen weeye. Matalan nin ameerika ka socda Filip xabib baa jira asaga Dimishqi buu tagaa, Tel Avivi uu tagaa, Qaahira uu tagaa. Sucuudigu uu tagaa, qola kasta ra’yigeeda ayuu arkaa. Asagu shaqo kuma leh, wuxuu u geeyaa dowladdiisa, qola la arko ra’yigeedu waa kan uu leeyahay, asago shaqa kale ma leh. Marka waxaa la yiraahdaa ergo. Waxaa jiro erey kaleetoo aguug la yiraahdo, anigu saan u aqaano waxaa weeye gargeliyootan. Aniga iyo Fiqi Buraale ayaan wax isku haysannaa. Markaan isku qabsannay waxaan

leennahay aad u aguugno xaajada tan, aan u gargeliyoon Aw Daahir. Hana kala baxsho weeye. Waa u aguugtamaynaa amba waan gangalyoonaynaa. Gargelyo waxaa kaloo loo yaqaanaa aniga ayaa sida hadda la sheegaayey nimaan wax iga mudnayn aan ku xumeeyey. Marka habel baa wuxuu leeyahay: “hebel gargelyo ma ka gashaa?“. Macnaha waxaa weeye, ma qaban kartaa weeye waa ii gafayee. Marka gargelyada waa taa aguugna weeye. Aguug waxaa weeye aan dacwadayda aan u gaysanno. Aan u aguugno, ma ku kalsoon tahay weeye.

Axmed Nuur Aguug macna badan buu leeyahay sida “shir aguugan” baa la yiri macnaa duuduuban iyadoo duuduuban aan u tagno ninkaan, taa aad sheegeysana waa noqotaa. Waxaan ku soo gabagabaynaynaa dooddayni furanta ahay oo is ku noqnoqodka badnayd oo niman ka odayaasha doodayeen halkaasan ku soo gabagabaynaynaa.